UK Health Security Agency

NHS

# Hagaha tallaalada

# da’ada hal sano jirka



**Wuxuu muujinayaa jadwalka tallaallada laga bilaabo Sebtembar 2024**

immunisation

the safest way to protect your child

# Barnaamijka tallaalada carruurnimada

**Xasuusnow** inaad hore u soo qaadato buuggaaga cas ee tallaalka marka aad imaanayso ballan kasta.




Nuqullada buug-yarahaan ayaa laga helayaa rugta caafimaadka ama xarunta dhakhtarkaaga. Sidoo kale eeg **www.nhs.uk/vaccinations**

Buug-yarahan wuxuu muujinayaa jadwalka talaalka laga bilaabo Sebtembar 2024

# Guudmar

## Tallaaladee ayuu ilmahayga qaadan doonaa marka uu jiro hal sano?

Ilmahaaga waxa lagu duri doonaa 4 irbadood marka la gaaro booqashadooda tallaalka hal sano jirka ah oo ay ku jiraan:

- tallaalka xoojinta ee **MenB**
- tallaalka **Hib/MenC** ee ka dhanka ah:
  - Hib (Haemophilus influenzae nooca b), iyo
  - cudurka meningococcal ee kooxda C (MenC)
- tallaalka xoojiyaha ah ee **PCV13** ee ka dhanka ah:
  - cudurka pneumococcal oo ay sababaan qaar ka mid ah bakteeriyada pneumococcal
- tallaalkooda ugu horreeya ee **MMR** ee ka dhanka ah:
  - jadeecada
  - qaamo -qashiirta
  - jadeeco -jarmalka



# Tallaalada la qaato xilliga hal sano jirka

## Ka difaacida Hib, cudurka meningococcal ee kooxaha B iyo C, cudurka pneumococcal, jadeecada, qaamo-qashiirta iyo jadeeco-jarmalka

### Waa maxay Hib?

Hib waa caabuq keeni kara dhowr cuduro oo waaweyn sida qoorgooyaha (barar ku dhaca dahaarka maskaxda), septicemia (sumowga dhiigga) iyo oof-wareenka, gaar ahaan carruurta yaryar.

Tallaalka Hib/MenC waxaa loo yaqaanaa Menitorix, waxaad Xaashida Macluumaadka Bukaanka ka arki kartaa www.medicines.org.uk/emc/product/167/pil.

### Waa maxay cudurka meningococcal?

Cudurka Meningococcal waa cudur halis ah oo sidoo kale sababi kara cudurada qoorgooyaha iyo septicaemia ee carruurta iyo dhalinyarada.

Bakteeriyada meningococcal ee kooxda B (MenB) ayaa hadda mas'uul ka ah inta badan kiisaska cudurka meningococcal ee ka dhaca Boqortooyada Midowday (UK), halka cudurka meningococcal ee kooxda C (MenC) uu hadda yahay mid aan caam ahayn sababtoo ah inta badan carruurta yaryar iyo dhalinyarada ayaa si joogto ah looga tallaalaa MenC.

Tallaalka MenB waxaa loo yaqaanaa Bexsero, waxaad Xaashida Macluumaadka Bukaanka ka arki kartaa www.medicines.org.uk/emc/product/5168/pil.

## Tallaaladee ayaa la isticmaali doonaa?

Ilmahaaga wuxuu qaadan doonaa qiyaas/doos isku dhafan oo ah tallaalka Hib/MenC iyo sidoo kale qiyaasta/dooska xoojiyaha ah ee tallaalka MenB. Tallaaladan waxaa laga duri doonaa muruqa bowdada ama cududda sare.

## Muxuu ilmahaygu ugu baahan yahay tallaalada xoojiyaha ah?

Tallaalada xoojiyaha ah ayaa la bixiyaa si loo kordhiyo difaaca ay horey uga heleen tallaalada uu ilmahaagu hore u qaatay. Difaaca ay bixiyaan tallaalada la siiyo dhallaanka ayaa daciifi kara muddo ka dib. Qiyaasta/dooska xoojiyaha ah waxay kordhiyaan muddada difaaca ilaa nolosha dambe.

## Tallaalada Hib/MenC iyo MenB ma yeelan doonaan waxyeellooyin gaar ah?

Waxaa laga yaabaa in ilmahaaga uu gaduudasho, barar ama jilicsanaan kala kulmo meesha laga muday/durey. Qiyaas ahaan kala bar carruurta qaata tallaalladan ayaa laga yaabaa inay noqdaan kuwo cuncun dareema, qaarna waxay la kulmaan qandho fudud. Waxaad macluumaad dheeraad ah oo arrintan ku saabsan ka heli kartaa GP-gaaga, kalkaalisada caafimaadka ama booqdaha caafimaadka.



## Waa maxay cudurka pneumococcal?

Cudurka pneumococcal waa mid ka mid ah sababaha ugu caansan ee cudurka qoorgooyaha ee bakteeriyada ee ku dhaca carruurta laakiin sidoo kale wuxuu sababaa sumowga dhiigga, oof-wareenka, caabuqa dhegaha (otitis media) iyo cudurro kale oo halis ah. Waxaa jira in ka badan 90 nooc oo kala duwan oo bakteeriyada pneumococcal ah.

## Tallaalkee ayaa la isticmaali doonaa?

Tallaalka la isticmaalo waa qiyaasta/dooska xoojiyaha ah ee PCV13 (tallaalka pneumococcal conjugate) kaas oo ka hortaga 13 nooc oo pneumococcal ah oo inta badan sababa cudurada pneumococcal ee ku dhaca carruurta. Tallaalkan waxaa lagu duri doonaa muruqa bowdada ama cududda sare isla booqashada la bixinayo tallaalada Hib/MenC iyo MenB.

## Tallaalka PCV ma yeelan doonaa waxyeellooyin gaar ah?

10kii ilmood ee la tallaalo, 1 ama 2 ka mid ah ayaa laga yaabaa inay barar, gaduudasho ama jilicsanaan kala kulmaan goobta la duray ama ay yeeshaan qandho khafiif ah. Tallaalka PCV waxaa loo yaqaanaa Prevenar 13, waxaad Xaashida Macluumaadka Bukaanka ka arki kartaa www.medicines.org.uk/emc/product/453/pil.

## Waa maxay jadeecada?

Jadeecada waxaa sababa fayras aad u faafa. Ku dhawaad qof kasta oo uu ku dhaco cudurku wuxuu yeelan doonaa qandho sareysa, finan iyo guud ahaan caafimaad darro. Dhibaatooyinka cudurka jadeecada waxaa ka mid ah infakshanka xabadka, suuxdin (qalal), encephalitis (infekshanka maskaxda), iyo dhaawaca/waxyeellada maskaxda. Xaaladaha aadka u daran, jadeecada ayaa qofka dili karta.

## Waa maxay qaamo-qashiirta?

Qaamo-qashiirta waxa sababa fayras qofka u horseedi kara qandho, madax-xanuun, iyo qanjirro xanuun leh oo bararsan oo wejiga, qoorta iyo daanka ah. Cudurka wuxuu sababi karaa dhego la'aan joogto ah, fayraska qoorgooyaha iyo encephalitis (caabuqa iyo bararka maskaxda).

## Waa maxay jadeeco-jarmalka?

Jadeeco-jarmalka waa cudur uu sababo fayras. Cudurka inta badan waa mid khafiif ah oo aan la dareemin markuu ku dhaco carruurta, laakiin jadeeco-jarmalka markay qofka ku dhacdo xilliga uurka aad ayey ugu daran tahay dhallaanka aan weli dhalan. Waxay si xun u dhaawaci kartaa aragooda, maqalkooda, wadnahooda iyo maskaxdooda. Xaaladdan caafimaad waxaa loo yaqaannaa cudurka jadeeco-jarmalka ee lagu dhasho (CRS).

## Waa maxay tallaalka MMR?

Wuxuu ka kooban yahay noocyo daciif ah oo ah fayrasyada nool ee jadeecada, qaamo-qashiirta iyo jadeeco-jarmalka. Maadaama fayrasyada la daciifiyay, dadka tallaalka qaatay fayraska ma qaadsiin karaan dadka kale. Gudaha UK waxaan yaala 2 tallaal oo MMR ah. Labaduba si fiican ayay u shaqeeyaan; mid ka mid ah waxaa ku jira maadada gelatiinka, kan kalena kuma jiro. Haddii aad rabto in ilmahaaga uu qaato tallaalka aan lahayn maadada gelatiinka, kala hadal kalkaalisadaada ama GP-gaaga.

## Sidee iyo goorma ayaa tallaalka la bixiyaa?

Tallaalka waxa lagu duraa muruqa bowdada ama cududda sare. Waxa la bixiyaa marka ay ilmaha jiraan hal sano ka dib markii habdhiska difaaca jirka ee uu ilmuhu ke helay hooyadood ay dhamaato. Qiyaasta/dooska labaad ee tallaalka waa in mar kale la bixiyaa ka hor inta aanu ilmahaagu bilaabin dugsiga da'a ahaan markuu jiro ku dhawaad 3 sano iyo 4 bilood.



## Sidee waxtar u leeyahay tallaalka MMR?

Tallaalka MMR ayaa mas'uul ka ahaa baabi'inta 3-dan cudur ee ku dhacayay carruurta yaryar ee gudaha UK tan iyo markii la bilaabay 1988-kii.

## Tallaalka MMR ma yeelan doonaa waxyeellooyin gaar ah?

3-da fayras ee kala duwan ee ku jira tallaalka waxay shaqeeyaan waqtiyo kala duwan waxaana laga yaabaa inay soo saaraan waxyeelooyinka gaarka ah ee soo socda ka dib markii la qaato qiyaasta/dooska koowaad:

- 6 ilaa 10 maalmood ka dib qaadashada tallaalka, maadaama qaybta jadeecada ee tallaalka ay bilaabayso inay shaqeyso, qiyaas ahaan mid ka mid ah 10kii carruur ee la siiyo tallaalka ayaa laga yaabaa inuu yeesho qandho qaarna waxaa laga yaabaa inay yeeshaan finan khafiif ah oo u eg finanka jadeecada waxayna ka haraan cunista cuntadooda.
- qiyaas ahaan mid ka mid ah 1,000kii carruur ee la tallaalo ayaa laga yaabaa inay la kulmaan suuxdin/qalal oo ay sababto qandhada. Taasi waxa loo yaqaanaa 'xummad gariir'. Si kastaba ha ahaatee, carruurta aan la tallaalin oo ay ku dhacdo jadeeco, waxay 3 jeer uga dhowyihiin inay la kulmaan suuxdin/qalal
- qiyaas ahaan 3 usbuuc ka dib qaadashada tallaalka MMR, maadaama qaybta qaamo-qashiirta ee tallaalka ay bilaabayso inay shaqeyso, carruurta qaarkood waxaa laga yaabaa inay si naadir ula kulmaan astaamaha qaamo-qashiirta (qandho iyo qanjirada oo barara)

**MMR waa habka ugu badbaadada badanee ilmahaaga** looga difaaco jadeecada, qaamo-qashiirta iyo jadeeco-jarmalka.

- si aad naadir u ah, carruurtu waxaa ku dhici kara finan yaryar oo nabarro u eg 6 usbuuc gudahood ka dib qaadashada tallaalka. Arrintaan waxaa badanaa sabab u ah qaybaha jadeecada ama jadeeco-jarmalka ee tallaalka. Haddii aad aragto dhibco finankaas u eg, ilmahaaga u geey dhakhtarka si loo eego. Dhakhtarkaaga ayaa kuu sheegi doona sida loola tacaalo finanka iyo sida loo ilaaliyo ilmahaaga mustaqbalka
- in ka yar hal ka mid ah milyankii carruur ah ayaa laga yaabaa inay yeeshaan encephalitis (caabuqa iyo barar maskaxda ah) ka dib qaadashada tallaalka MMR. Si kastaba ha ahaatee, haddii ilmuhu ku dhaco jadeeco, fursada ah inuu qaado encephalitis waa in u dhaxaysa hal ka mid ah 200dii ee carruur iyo hal ka mid ah 5,000tii ee carruur

## Maxaa dhacaya haddii ilmahayga uu xasaasiyad ka qabo ukunta?

Tallaalka MMR si badbaado leh ayaa loo siin karaa carruurta xasaasiyad daran (falcelinta anaphylactic) kala kulmay ukunta. Haddii aad wax walaacyo ah qabtid, la hadal booqdahaaga caafimaad, kalkaalisada caafimaadka ama dhakhtarkaaga.

## Tallaalka MMR ma ku jirtaa maadada gelatiinka?

Gudaha UK, waxaa ka jira 2 tallaal oo MMR ah oo si fiican u shaqeeya. Mid ka mid ah waxaa ku jira maadada gelatiinka, kan kalena kuma jiro. Haddii aad doorbidayso inaad qaadato tallaalka aan ku jirin maadada gelatiinka, la hadal kalkaalisada caafimaadka ama GP-gaaga. Waxaad Xaashida Macluumaadka Bukaanka ee tallaalka MMR ka eegi kartaa:

**Priorix:**
www.medicines.org.uk/emc/product/1159/pil

**MMRVAXPRO:**
www.medicines.org.uk/emc/product/6307/pil

# Iska ilaali qoorgooyaha iyo sumowga dhiigga

Qoor-gooyaha iyo sumowga dhiiga labaduba aad bay halis u yihiin. Waa muhiim inaad garato calaamadaha iyo astaamaha oo waa in aad taqaanaa waxaad samayn lahayd haddii aad aragto.

Calaamadaha hore ee cudurada qoorgooyaha iyo sumowga dhiiga waxay la mid noqon karaan astaamaha hargabka ama ifilada (qandho, matag, cuncun iyo degenaansho la'aan).

Si kastaba ha ahaatee, shakhsiyaadka qaba qoorgooyaha ama sumowga dhiiga waxay si xun ugu xanuunsan karaan saacado gudahood, sidaas darteed waa muhiim in la ogaado calaamadaha iyo astaamaha xaaladahan caafimaad.



## Waa maxay cudurka qoorgooyaha?

Cudurka qoorgooyaha waa caabuq ku dhaca dahaarka maskaxda. Cudurka qoorgooyaha waxaa sababi kara dhowr nooc oo bakteeriya ama fayras ah.

Caabuqa bakteeriyada meningococcal waxay keeni kartaa cudurka qoorgooyaha, septicaemia (sumowga dhiiga), pericarditis (caabuqa xuubka goobida ay ku jirto wadnaha) iyo arthritis (bararka kala goysyada jirka).

Dhallaanka, astaamaha ugu waaweyn ee cudurka qoorgooyaha waxaa ka mid noqon kara:

- oohin sareysa, oo cabaad leh
- xanaaqa marka kor loo qaado
- food/deen bararsan
- dawakhsan oo jawaab-celinta ku yar - ay adagtahay in hurdo laga toosiyo
- dhaadhac ah oo aan tiir lahayn
- dhaqdhaqaaqyo qallafsan oo adag sameeya (qalal/suuxdin)
- diidaya quudin, matag
- maqaar midab cirro ah leh, dhuuban ama buluug isu beddelaya
- qandho



## Waa maxay septicaemia (sumowga dhiiga)?

Septicaemia waa xaalad caafimaad oo aad halis u ah marka qulqulka dhiigga uu caabuq qaado. Astaamaha gacmaha iyo cagaha qabow, maqaarka oo midab cirro ah yeesha, matag iyo hurdo badan ama ay adag tahay in hurdada laga toosiyo ayaa si degdeg ah u soo if-bixi kara. Haddii aad ka shakisan tahay cudurka septicaemia, caawimaad u raadso si degdeg ah.

Dhallaanka, astaamaha ugu waaweyn ee cudurka septicaemia waxaa ka mid noqon kara:

- habka neefsashada oo degdeg ah ama aan joogto ahayn
- maqaar midab cirro ah leh, dhuuban ama buluug isu beddelaya
- qandho iyo gacmaha iyo cagaha oo qabow noqda
- gariirid
- matag iyo diiditaanka quudinta
- baro guduudan ama guduud-xigeen ah oo aan baaba'ayn marka cadaadis la saaro (samaynta tijaabada muraayadda ayaa lagu sharaxay bogga xiga)*
- xanuun ama cuncun ka yimaada muruq xanuun ama xanuun aad u daran oo addimada ama kalagoysyada ah
- dhaadhacnimo
- si aad u daran u hurdaysan

Waxaa muhiim ah in la xasuusto in qof kastaa uusan la kulmi doonin dhammaan astaamaha liiska ku jira, iyo in liiskan astaamaha uusan ahayn mid dhammaystiran. Haddii uu qofku yeesho qaar ka mid ah astaamaha, gaar ahaan dhibco guduudan ama guduud-xigeen ah, gargaar caafimaad u raadso si degdeg ah. Haddii aadan la xiriiri karin dhakhtarkaaga, ama aad weli ka welwelsan tahay helitaanka talo, ku kalsoonow dareenkaaga oo ilmahaaga geey qaybta gargaarka degdegga ah ee isbitaalka kuugu dhow.

* Maqaarka madow, ka eeg gudaha daboolka indhaha ama saqafka afka halkaas oo dhibcaha si muuqda looga arki karo



## ‘Tijaabada muraayadda/ galaaska’

Geeska galaaska cabitaanka waxaad si adag ugu qabataa finanka si aad u aragto haddii finanka ay baaba’ayaan oo midabka uu ka lumayo marka la saaro cadaadis. Haddii midabka isbeddeli waayo, la xiriir dhakhtarkaaga isla markiiba.

## Xagee ayaan ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?

Hay'adahan samafalka ah waxay bixiyaan macluumaad, talooyin iyo taageero:

**Meningitis Research Foundation**
Khadka Caawimaada ee bilaashka ah 080 8800 3344 (9am ilaa 10pm maalmaha usbuuca,10am ilaa 8pm maalmaha dhamaadka usbuuca iyo xilliyada fasaxyada)
www.meningitis.org

**Meningitis Now**
Khadka caawimaada ee shaqeeya 24 saac
0808 8010 388 www.meningitisnow.org

Waxaad sidoo kale talo weydiisan kartaa dhakhtarkaaga, kalkaalisada caafimaadka ama booqdaha caafimaadka, ama **NHS** ka wac **111**.

**Waalidiinta iyo daryeelayaasha waxay soo sheegi karaan dhibaatooyinka looga shakisan yahay tallaalada iyo daawooyinka iyagoo u maraya Yellow Card Scheme.**

Waxaa sidaas lagu samayn karaa khadka iyadoo la booqanayo **yellowcard.mhra.gov.uk** ama iyadoo khadka caawimaada ee Yellow Card laga wacayo **0800 731 6789**. Waxaad sidoo kale isticmaali kartaa koodhka QR ama adigoo la soo degaya ablikeeshinka Yellow Card.

# Barnaamijka tallaalka carruurnimada ee joogtada ah laga bilaabo Sebtembar 2024

| Da'da ay tahay in la qaato | Cudurada uu kaa difaacayo | Tallaalka la bixinayo |
|---|---|---|
| Sideed usbuuc jir | Gawracatada, teetanada, xiiq-dheerta (xiiqdheer), cudurka dabaysha, *Haemophilus influenzae* nooca b (Hib) iyo cagaarshowga B | DTaP/IPV/Hib/HepB |
| | Cudurka Qoorgooyaha kooxda B (MenB) | MenB |
| | Rotavirus gastroenteritis (cudurka gastiriga/ caloosha) | Rotavirus[2] |
| Laba iyo toban usbuuc jir | Gawracatada, teetanada, xiiq-dheerta, cudurka dabaysha, Hib iyo cagaarshowga B | DTaP/IPV/Hib/HepB |
| | Oofwareen (13 noocyo) | Tallaalka isku dhafan ee oofwareenka (PCV) |
| | Rotavirus | Rotavirus[2] |
| Lix iyo toban usbuuc jir | Gawracatada, teetanada, xiiq-dheerta, cudurka dabaysha, Hib iyo cagaarshowga B | DTaP/IPV/Hib/HepB |
| | MenB | MenB |
| Hal sano jir (marka la gaaro ama kadib sanadguurada koowaad ee ilmaha) | Hib iyo MenC | Hib/MenC |
| | Oofwareen | Tallaalka xoojiyaha ah ee PCV |
| | Jadeecada, qaamo-qashiirta iyo rubella (jadeeco-jarmalka) | MMR |
| | MenB | Tallaalka xoojiyaha ah ee MenB |
| Kooxda da'da carruurta ah ee u qalma[4] | Hargabka/ifilada (sanad kasta laga bilaabo Sebtembar) | Tallaalka hargabka/ ifilada tooska ah ee la dilay LAIV[3,6] |
| Saddex sano iyo afar bilood jir ama wax yar kadib | Gawracatada, teetanada, xiiq-dheerta iyo cudurka dabaysha | dTaP/IPV |
| | Jadeeco, qaamo-qashiirta iyo jadeeco jarmalka | MMR (hubi dooska koowaad ee la siiyey) |
| Wiilasha iyo gabdhaha da'doodu u dhaxayso laba iyo toban ilaa saddex iyo toban sano jir | Kansarka iyo burooyinka xubnaha taranka ee ay sababaan noocyada 'papillomavirus'' ee gaarka ah ee ku dhaca aadanaha (HPV). | HPV[5] |
| Afar iyo toban sano jir (Sannad dugsiyeedka 9-aad) | Teetanada, gawracatada iyo cudurka dabaysha | Td/IPV (hubi heerka MMR) |
| | Cudurka qoorgooyaha ee kooxaha A, C, W iyo Y | MenACWY |

**[1]** Duritaanka murqaha ee murqaha isku xirka kala-qoysyada ah oo lagu duro cududa sare ama bowdada. **[2]** Tallaalka Rotavirus waa in la siiyaa keliya ka dib marka la eego natiijada baaritaanka SCID. **[3]** Waxaa ku jira maadada gelatiinka. **[4]** Warqadda ifilada ee sanadlaha ah ka eeg: www.gov.uk/government/collections/annual-flu-programme. **[5]** Eeg Green Book HPV Cutubka 18a si aad u hesho wixii faahfaahin ah oo ku saabsan tallaalida dadka da'ada yar ee habdhiska difaaca jirkooda uu daciifka yahay kuwaas oo u baahan doona 3 doos/qiyaasood. **[6]** Haddii LAIV (tallaalka ifilada ee la diley) uu yahay mid lidi ku ah habdhiska difaaca jirka ama aysan habboonayn isticmaalka tallaalka ifilada ee aan firfircoonayn (ka eeg Green Book Cutubka 19 wixii faahfaahin ah). **[7]** Ka eeg Green Book Shingles Cutubka 28a wixii faahfaahin ah oo ku saabsan kooxaha da'ada ee u qalma oo ay ku jiraan shakhsiyaadka habdhiska difaaca jirkooda uu aad daciif u yahay ee laga bilaabo da'da 50 sano.

## Tallaalo dheeraad ah oo loogu talagalay shakhsiyaadka qaba xaalado caafimaad oo qarsoon

| Xaalada caafimaad | Cudurada uu kaa difaacayo | Tallaalada loo baahan yahay[1] |
|---|---|---|
| Maqnaanshaha ama si xun u shaqeynta beeryarida (oo ay ku jiraan cudurka sickel-cell-ka iyo cudurka isla dagaalanka xubnaha jirka) | Cudurka qoorgooyaha kooxaha A, B, C, W iyo Y<br>Oofwareen<br>Hargabka/ifilada | MenACWY<br>MenB<br>PCV13 (ilaa 10 sano jir)[2]<br>PPV23 (laga bilaabo 2 sano jir)<br>Tallaalka ifilada ee sannadlaha ah |
| Qalabka maqalka ee dhegaha lagu tallaalo | Oofwareen | PCV13 (ilaa 10 sano jir)[2]<br>PPV23 (laga bilaabo 2 sano jir) |
| Xaaladaha caafimaad ee ku dhaca neefmareenka iyo wadnaha (sida cudurka neefta, cudurrada sambabada, iyo shaqo-gabista wadnaha) | Oofwareen<br>Hargabka/ifilada | PCV13 (ilaa 10 sano jir)[2]<br>PPV23 (laga bilaabo 2 sano jir)<br>Tallaalka ifilada ee sannadlaha ah |
| Xaaladaha caafimaadka ee neerfaha ee raaga (sida cudurka Parkinson ama cudurka shaqeynta neerfayaasha maskaxda, ama naafanimada waxbarashada) | Oofwareen<br>Hargabka/ifilada | PCV13 (ilaa 10 sano jir)[2]<br>PPV23 (laga bilaabo 2 sano jir)<br>Tallaalka ifilada ee sannadlaha ah |
| Cudurka sonkorowga | Oofwareen<br>Hargabka/ifilada | PCV13 (ilaa 10 sano jir)[2]<br>PPV23 (laga bilaabo 2 sano jir)<br>Tallaalka ifilada ee sannadlaha ah |
| Cudurka kelyaha ee raaga (CKD) (oo uu ku jiro sifeynta dhiigga) | Oofwareen (CKD-da marxaladda 4 iyo 5)<br>Hargabka/ifilada (CKD-da marxaladda 3, 4 iyo 5)<br>Cagaarshowga B (CKD-da marxaladda 4 iyo 5) | PCV13 (ilaa 10 sano jir)[2]<br>PPV23 (laga bilaabo 2 sano jir)<br>Tallaalka ifilada ee sannadlaha ah<br>Cagaarshowga B |
| Xaaladaha caafimaad ee beerka ee raaga | Oofwareen<br>Hargabka/ifilada<br>Cagaarshowga A<br>Cagaarshowga B | PCV13 (ilaa 10 sano jir)[2]<br>PPV23 (laga bilaabo 2 sano jir)<br>Tallaalka ifilada ee sannadlaha ah<br>Cagaarshowga A<br>Cagaarshowga B |
| Cudurka dhiig-baxa | Cagaarshowga A<br>Cagaarshowga B | Cagaarshowga A<br>Cagaarshowga B |
| Cadaadis saarista habdhiska difaaca jirka oo ay sabab u tahay cudur ama daawayn[4] | Oofwareen<br>Tallaalka shingaliska/cambaarta<br>Hargabka/ifilada | PCV13 (ilaa 10 sano jir)[2,3]<br>PPV23 (laga bilaabo 2 sano jir)<br>Shingrix - ka weyn 50 sano jir[5]<br>Tallaalka ifilada ee sannadlaha ah |
| Cilladaha dhammaystirka ah (ay ku jiraan dadka qaadanaya teerabiyada kahortagga kaabayaasha) | Cudurka qoorgooyaha kooxaha A, B, C, W iyo Y<br>Oofwareen<br>Hargabka/ifilada | MenACWY<br>MenB<br>PCV13 (ilaa 10 sano jir)[2]<br>PPV23 (laga bilaabo 2 sano jir)<br>Tallaalka ifilada ee sannadlaha ah |

**[1]** Eeg cutubyada khuseeya ee buugga Green Book si aad u aragto jadwalka gaarka ah: www.gov.uk/government/collections/immunisation-against-infectious-disease-the-green-book. **[2]** Haddii ilmaha uu jiro 2 sano ilaa da'a ka yar 10 sano uuna yahay mid habdhiska difaaca jirkiisa uu daciif yahay ama uu qayb ahaan habdhiska difaaca jirkiisa uu daciif yahay si uu isaga difaaca cudurka pneumococcal, sii hal doos/qiyaas oo PCV13 ah. **[3]** Da'a kasta oo habdhiska difaaca jirka aad daciif uga ah. **[4]** Tixgeli tallaal siinta ifilada ee sanadlaha ah ee xubnaha qoyska iyo dadka daryeela dad qaba xaaladahan caafimaad. **[5]** Ka eeg Green Book Shingles Cutubka 28a www.gov.uk/government/publications/shingles-herpes-zoster-the-green-book-chapter-28a.

# Barnaamijka tallaalka carruurnimada ee xulashada ah

| Kooxda bartilmaameedka ah | Da'da iyo jadwalka | Cudurka | Tallaalka loo baahan yahay |
|---|---|---|---|
| Ilmaha ay dhaleen hooyooyinka qaba cudurka cagaarshowga B | Xilliga dhalashada, afar usbuuc jir iyo 12 bilood jir[1,2] | Cagaarshowga B | Cagaarshowga B (Engerix B/HBvaxPRO) |
| Dhallaanka ku nool qeybaha wadanka ee uu ku badan yahay cudurka TB >= 40/100,000 | Qiyaastii 28 maalmood jir[4] | Cudurka qaaxada | BCG |
| Dhallaanka waalidkood ama awoowahood/ ayeeyadood ku dhashay wadan uu cudurka ku badan yahay[3] | Qiyaastii 28 maalmood jir[4] | Cudurka qaaxada | BCG |
| Carruurta caafimaad ahaan khatar ku jirta | Laga bilaabo 6 bilood ilaa 17 sano jir | Hargabka/ifilada | LAIV ama tallaalka hargabka aan noolayn haddii uu lid ku yahay LAIV ama ilmaha uu ka yar yahay 2 sano jir |
| Haweenka uurka leh | Marxalad kasta oo uu uurka marayo inta lagu jiro xilliga hargabka/ifilada | Hargabka/ ifilada | Tallaalka hargabka ee aan noolayn |
| | Laga bilaabo 16 toddobaad ee uurka[5] | Xiiq-dheerta | Tdap ama dTaP/IPV |
| | Laga bilaabo usbuuca 28 ee uurka | RSV | Tallaalka RSV |

**[1]** Ka qaad dhiig si looga baaro HBsAg markuu 12 bilood jir yahay si meesha looga saaro wixii caabuq ah. **[2]** Ka sokow tallaalka hexavalent (Infanrix hexa ama Vaxelis) ayaa la siiyaa usbuucyada 8, 12 iyo 16. **[3]** Halka tirada sanadlaha ah ee tiibayda ay tahay >= 40/100,000 – eeg www.gov.uk/government/publications/tuberculosis-tb-by-country-rates-per-100000-people. **[4]** Eeg natiijada baaritaanka SCID ka hor intaan la siin tallaalka BCG. **[5]** Caadi ahaan ka hor 32 usbuuc ee uurka lakin waxaa weli la siin karaa ka dib usbuuca 32 ee uurka.

NHS

Produced by
**UK Health Security Agency**

© Crown copyright 2024
2024QG1SOM Somali 1p 500K AUG 2024
UK Health Security Agency gateway number: 2024516

Daabacaadan waxaa markii ugu horeysay la daabacay Diseembar 2019.

Haddii aad u baahan tahay nugulo badan oo buug-yarahan ah, fadlan booqo, www.healthpublications.gov.uk si aad ula xiriirto khadka dalbashada ee Health Publications. Ph1: 0300 123 1002.
Minicom: 0300 123 1003 (8am ilaa 6pm, Isniin ilaa Jimco).

Fadlan isticmaal koodhka badeecada: 2024QG1SOM Somali

**www.nhs.uk/vaccinations**